



*The Transitional Federal Government of the Somali Republic  
Office of the Prime Minister*

Ref: XRW/OM/PR 00144/03/12

Date: 23 Maars 2012

SHIR JARAA'ID  
TACSI QARAN

MADAXWEYNE ABDULLAHI YUSUF AHMED  
INNAA LILLAHI WA INAA ILLEYHU RAAJICUUN

Ugu horreyn waxaan shacabka soomaaliyeed iyo si gaar ah xaaskiisa iyo carruurtiisa uga tacsiyeynaya geeridii saakay arroortii salaada subux ka hor ku timid Madaxweyne Abdullahi Yusuf Ahmed oo ku geeriyyoday Sheikh Zayed Hospital ee Abu Dhabi. Geeridu waa xaq, waqtigiisa ayaana dhammaaday, waxaana EEBBE uga baryayaa inuu Janadii Fardowsa ka waraabiyo, dhammaan ummadda Soomaaliyeedna Samir iyo IIMAAN ka siiyo.

Waxaan nasiib u yeeshay inaan dhowaan ku soo booqday Madaxweynihii hore Isbitaalka uu ku jirey ee Abu Dhabi.

Marxuum Abdullahi Yusuf waxuu ifka uga tagey xaas, iyo afar carruur ah ( 2 rag ah iyo 2 dumar ah).

Marxuum Abdullahi Yusuf waxuu wakhtigiisa inta badan u huray ummadda Soomaaliyeed iyo sidii dalku ku heli lahaa Dowlad waarta. Marxuumku waxuu ahaa Madaxweynihii ugu horreeyey ee Dowladda Federaalka KMG ah ee la aasaasay October 2004. Ka hor Madaxweyne Abdullahi Yusuf waxuu ahaa Madaxweynaha Puntland, horseedna u ahaa nabadeynta iyo aasaaska Puntland.

Waxaan maanta isagu yeeray xubnaha golaha Wasiirada oo aan shir deg-deg ah yeelanay ugana hadalnay habka ugu habboon ee aan dowlad ahaan isagu diyaari karno aas iyo tacsi qaran.

Waxaan u xil-saaray guddi heer Qaran oo ku wajahan sidii Aas Qaran loogu sameyn lahaa Madaxweyne Abdullahi Yusuf Ahmed.

Golahu waxey isku raaceen:

1. In Tacsi iyo Aas heer Qaran ah loo sameeyo Madaxweynihii hore.
2. In Calanka Soomaaliya hoos loo dhigo muddo 7 cisho ah.
3. In Safaaraadaha Soomaaliya la dhigo buuga tacsida.
4. In muddo seddex cisho ah idaacadaha iyo TV ga Qaranka ay sameeyaan baroor-diiq.

Guddiga Aaska Qaranka ee Madaxweynihii hore ayaa ka kooban:-

1. Abdiwahab Ugas Xuseen Ugas Khalif – Ra'iisul Wasaare Ku xigeen ahna Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha – Guddoomiyaha Guddiga

2. Ugas Axmed Gaboobe (Ugas Bile)
3. Cabdisamad Macallim Maxamud Sh. Xasan
4. Cabdullahi Xaaji Xasan
5. Cabdulqaadir Xuseen Maxamed (Jahweyn)
6. Cabdiazip Sheikh Yusuf
7. Maxamud Macallin Nuur
8. Axmed Maxamud Axmed (Yaqshid)
9. Siciid Jama Qorsheel
10. Cabdullahi Sheikh Cali (Qaloocow)
11. Maxamuud Axmed Nuur (Tarzan)

